CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

# Tillaabooyinka Lagu Gaaro Guusha:

# La xiriirida Iskoolka Cunuggaaga



*Hadii aad leedahay cunug qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxaa aad loo filayaa inaad aad ugu lug lahaato iskoolka cunuggaaga iyo arimaha macalimiintiisa — sida waxbarashada, naqtiinka iyo qiimenynta barnaamijka waxbarasho ee cunuggaaga. Ayaan markii la joogo, waxaad baran doontaa wax badan oo ku saabsan hannaanka waxbarashada gaarka ah iyo sida loo sameeyo xiriirka iyo wada xaajoodka aad u galayso cunuggaaga dartii.*

*Ayadoo aqoontaada, xirfadaada, iyo kalsoonidaadu ay si dabiici ah u kordhi doonto, ayaa waxaa jira xirfado xiriir oo gaar ah kuwaasoo kugu caawin doona inaad aad ugu guulaysato, inaad iskaashi xooggan iskoolka la yeelato ood marwalba iskaashi xooggan la lahaato cunugaaga iskuulkiisa. Waxaan rajeyneynaa in "Tillaabooyinkaan Lagu Gaaro Guusha" ay gaar ahaan caawin doonaan waalidiinta uu hannaanka waxbarashada gaarka ah ku cusub yahay.*

*Maamulka mashruuca CADRE ayaa maal galiya*

IDEAs that Work
U.S. Office of Special Education Programs

## Bilow


Marka hore, faham in dowrkaaga ka waalid ahaan uu yahay mid muhiim ah oo kaligii noociisu yahay. Cidna uma taqaan oo uma jecla cunuggaaga sida aad adigu u taqaano oo aad u jeceshahay. Adiga ayaa khabiir ku ah cunuggaaga. Oo, adiga oo laga yaabo inaadan hayn dhammaan waxyaabaha xalku ku jiro, hadana waxaad doonaysaa in cunuggagu guul ka gaaro waxbarashada iskoolka iyo noloshaba. Jacaylka aad ka waalid ahaan u qabto cunuggaaga ayaa kugu caawin kara inaad xiriirka u samayso si wanaagsan, mararka qaarkoodna, wuuba kula talax tagi karaa.

### *Marka,* Tillaabada 1. *Ka fakar cadaadiska dhanka dareenka ah marka aad la shaqeyneyso iskoolka cunuggaaga.*

Hadii aad filayso in caqabad kula soo gudboonaato marka aad la kulmayso shaqaalaha iskoolka, maskaxdaada iyo jirkaaga waxay u diyaar garoobayaan dagaal. Sidee si guul leh xiriir u samayn kartaa hadii aad qarka u saaran tahay inaad la qarxato murugo iyo caro? *Maskaxdaada ha u ogolaan in ay heerkaa gaarto.* Ka ilaali dhibaatooyinkii iskoolka ee hore ka fakaritaankooda (ama kuwa haatanba taagan), cabsida ugu daran, iyo waxyaabaha kale ee xunxun in ay ku soo guurguurtaan oo soo galaan maankaaga. Hadafyadaada si wanaagsan diirada u saar iyo aragtida ah in maamulka iskoolku u baahan yahay inuu wixii uu u qaban karo uu u qabto cunuggaaga. U sheeg naftaada had iyo jeer in adiga iyo cunuggaaguba aad guulaysan doontaan.

### Tillaabada 2. *Mudnaan Sii oo Qorshee.*

Waa maxay waxa ugu muhiimsan ee loo baahan yahay in cunuggaaga loo helo? Samee liis ku saabsan arimo, su'aalo, iyo xalal macquul ah. Darajooyin u kala yeel. Go'aan ka gaar bal in ay jiraan qaar aad ka gudbi karto iyo kan (ama kuwa) ay tahay in wax laga qabto. Qorshee sida aad u rabto inaad wax u bixiso iyo sida aad wax u rabto inaad u qaadato si aad u gaarto hadafka ka sareeya. Si fiican u qorshee waxa aad doonayso inaad tiraahdo ama aad ku dhaqanto, hadii taasi ay ku caawinayso:



> *"Waxa iminka aad muhiimka ugu ah Jordan waa..."*
>
> *"Waxaan run ahaantii doonaynaa inaan diirada saarno..."*

Tixraacida xasuusahaa tirada yar, ayadoo jumladaha ugu muhiimsan meel lagu qoray, ayaa wax ka tari kara sidii adiga iyo shirkaba laidunkula socon lahaa.

### Tillaabada 3. *Si fiican u dhagayso si aad u fahanto ra'yiga qofka kale.*

Hadii aadan fahmayn waxa qof kale uu sheegayo, u sheeg asaga ama ayada inaadan fahmayn. Toos ahow:



> *"Ma fahmin waxa aad sheegeyso. Si kale ma u sheegi kartaa ama ma isiin kartaa tusaaleyaal?"*
>
> *"Miyuu jiraa wax aad itusin karto,oo qoraal ah, si aan si buuxda ugu fahmo?"*

Weydii su'aalaha oo sug jawaabaha ilaa aad ka fahanto. Iska ilaali wixii damac ah ee aad dareento oo aad ku doonayso inaad kaga jawaabto su'aalihii adigu aad weydiisay ama qof kale jawaabaha afka ha u galin.

### Tillaabada 4. *Kala caddee caddeymahaaga hadii aad aragto shacuur isku murugsan oo ka muuqata qof wajigiis isla markaana weydii qeexitaan.*

Si sharraxaad ah u dhig, ama jumlado kale ku sheeg si adiga iyo dadka kalaba aad u noqotaan kuwo fahamkoodu cad yahay.

Si loo fahmo:

> *"Waxaa laga yaabaa in arinkan aanan si cad u sharraxayn, waxa aan isku dayayo inaan sheego waa..."*
>
> *"Halkaan waxaa ah nuqul ah...Bal aan isla fiirino dhammaanteen. Wuxuu muujinayaa in ..."*

Si aad u fahamtaan:

> *"Waxay u muuqataa inaad leedahay..."*
>
> *"Hadii aan si sax ah kuu fahmo, waxaad leedahay... Taasi ma saxbaa?"*
>
> *"Meel ay sidaasi ku qoran tahay miyay jirtaa si aan u aqriyo?"*

Badanaa, hannaanka kala caddeynta qof sida uu wax u fahmay waxay bixisaa fursada ah in la caddeeyo fikir qalad loo fahmay ama in la saxo xog sidii laga rabay maahee si kale loo sheegay taasoo muhiim u noqon karta in loo helo xal lagu qanco cunuggaaga. Marka, ha iska indha tirin qiimaha habkaani leeyahay.

### Tillaabada 5. *Xulashooyin kala duwan maanka ku hay oo sheeg si looga munaaqashoodo, maadaama loo baahan yahay.*

Maadaama aad tahay qof waalid ah, waxaad leedahay meeqaamka aad ku soo bandhigi karto xalal kale oo laga yaabo in aysan kujirin qorshaha dadka u shaqeeya nidaamka iskoolka. *(Sida waafaqsan maahmaahda ah,"oo la macno ah marmar waxaad aragtaa hawdka guud ahaan ee geedaha kuyaal dhammaantood ma aragtid, macnaha xalka guud ayumbaa marmar kuu muuqda ee kuuma uu muuqdo xal walba oo la heli karo."):*

*"Aanu aad uga wada tashano macquulgalnimada oo aan aragno xalka aanu heli karno. Waa sidee hadii aan..?"*

Oo hadii aad soo samaysay xoogaa cilmibaaris ah, macluumaad aruurin, ama aad soo heshay wax ah talo bixino rasmi ah:

*"Waxaa halkaan ah talobixino laga helay ...kuwaasoo arday kale markii ay isticmaaleen ay guulaysteen. Waa inaan si dhab ah ugu isticmaalno arinkan Janey."*

*"Arinkan aan tijaabino muddo 8 asbuuc ah oo aan bal ogaano sida uu ku soo baxo."*

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la xaqiijiyo in diiradu mar walba ay saarnaato cunuggaaga iyo sidii baahidiisa loo dabooli lahaa. Mararka qaarkood, oraahda la midka ah kuwa soo socda ayaa sii dhiirigalin kara in diiradu cunuggaaga ay saarnaato:

*"Jordan aabihii iyo anigu waxaan iminka ogaanay horumarka laga doonayo in Jordan uu sameeyo. Waa maxay xulashooyinka kale ee aan u isticmaali karno asaga?"*

## Tillaabada 6.*Adigu bani'aadmi ayumbaad tahay.*

Hadii qof uu gaar ahaan uu ku caawiyay, dadaalkiisa uga mahadnaq. Marmar, gaar ahaan markii niyadjabku bato, ka maqsuuditaanka wixii si wacan u qabsoomay, iyo sida qof walba u shaqeeyay, jawiga ayuu macaaneeyaa xoogaa waxayna qof walba u suurta galisaa inuu sidii hore si ka wanaagsan uu dareemo oo uu usii socdo dhanka khadka dhammaadka!



Hadii, si kama' ah uu khalad kaaga dhaco, ama aad dambi gasho, waxaad dhahdaa, waan ka xumahay. Inaad raali galin samayso waxay muujisaa inaad bani'aadmi tahay waxayna khalad bani'aadmi u muujisaa waxa badanaa noqda hannaan rasmi ah oo waxay dirtaa farriinta ah in aad adba cafin karto khalad dad kale ay kaa galeen. "Fadlan iyo mahadsanid" waxay aad uga dhigaan wada sheekeysiga mid ka dhexeeya dad rayid ah, waxayna si aan la yaab lahayn ay wax uga taraan in qof waliba yiraahdo "haa."

## Ugu dambaynata, weydii "haada"

Inta aad wada hadlaysaan oo aad wada xiriiraysaan, waxaad heli doontaan waxyaabo adiga iyo iskuulku aad heshiis ku tihiin. Waxaa laga yaabaa inaad isku raacdaan arimo ay tahay in wax laga qabto, balse aadnaan si buuxda isugu raacin sidii wax looga qaban lahaa. Tani waa marka ay gaar ahaan waxtar yeelan karto in dib loo qeexo oo laga wada hadlo xulashooyinka habka dhibaato xallinta. Tani macnaheedu waa soo jeedinta iyo si buuxda u qaadaa dhigida wixii la soo jeediyayxalalka mudnaantooda leh. Macnaheedu sidoo kale waa weydiinta su'aalo toos ah oo hadana xushmad ay ku dheehan tahay sida:



*"Weli ma fahmin. Maxay arintani aysan xulasho u ahayn?"*

*"Jordan arintan wuu u baahan yahay. Yaa fikrad ka haya sidii aan arinkan u samayn lahayn?"*

Intaa waxaa dheer, oraahda garashada rabitaanada iyo caqabadaha hortaagan in maamulka iskuulku daboolo dhammaan baahida canug walba, adigoo dib diirada u saaraya cunuggaaga, waxay horseedi karaan rabitaan intii hore ka weyn oo dadaal dheeraad ah lagu saarayo loogana fakarayo si aad hal abuur u leh hababka loogu dhaho "haa" cunugaaga:

*"Waxaan ka maqsuudayaa xilka weyn ee nidaamka iskoolkeena iyo baahida inuu daboolo looga baahan yahay. Waxaan fahansanahay in marna aan la heli karin lacag nagu filan, iyo shaqaale nagu filan oo u daboola baahida carruurta oo dhan sida aan dhammaanteed u rabno. Run ahaantii, waan ogahay. Waxaad masuul ka tihiin daboolida baahida carruur fara badan. Shaqadeyda nambar kow waa in aan arko in baahida cunugayga la daboolay. Midkeena shaqadiisu ma fududa.*

*"Waxaan ogahay inuu jiro hab aan arinkaan uga wada shaqeyn karno dhammaanteen, si Janey ay u hesho adeegyada ay u baahan tahay. Sidee arinkaan u samayn karnaa?"*

## Ka hadlida hadalka.

Marka, gabagabadii, marka aad la hadlayso shaqaalaha iyo maamulka iskoolka cunuggaaga, waxaa loo badinaya inaad guulaysato hadii ad awoodo:

- Inaad isdajiso.
- Inaad waxyaabaha wanaagsan diirada saarto.
- Inaad naaftaada caddeyso.
- Inaad wax dhagaysato. Su'aalo weydii. Waxyaabaha kala caddee.
- Diirada ku hay daboolitaanka baahida cunuggaaga.
- Usoo bandhig xulashooyinka si iskaashi muujinaysa; tusaale ahaan, dheh, *"waan awoodnaa"* baddalkii aad oran lahayd *"waa inaad."* Dheh, *"haa, iyo..."* baddalkii *"haa, laakiin..."*
- Weydii "haada."

CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

PO Box 51360
Eugene, OR 97405-0906
(541) 686-5060 codka
(541) 686-5063 fakis
cadre@directionservice.org
www.directionservice.org/cadre

*Waxaa daabacay*
**CADRE**
*Caawinta Waalidiinta iyo Bareyaasha*
*Abuur Xalal Horumariya*
*Natiijooyinka oo loogu tala galay*
*Carruurta Curyaanka ah*

Dokumiintigaan waxaa sameeyay Xarunta Xalka Habboon ee Khilaafaadka ee la yirahdo (the Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education) loona soo gaabiyo  (CADRE), iyadoo taageera kaheleysa Xaruntii hore ee Caruurta Naafada ah ee loo yaqaano (National Dissemination Center for Children with Disabilities), oo hoostimaado Waaxda Waxbarashada Mareykanka, Xafiiska Heshiiska Wadaagga ah ee Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ee Mareykanka. H326D030001 & H326D080001. Tina Diamond, oo haysata shahaadada Ph.D., waxey eheyd sargaalka mashruuca. Afkaarta halkaan lagu shaaciyay mamathalayaan go'aanka Waaxda Waxbarashada ama TSharciyadeeda. Majirto ogolaansho guud ooy bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka oo ku saabsan wax soo saar wuxuu ka ahaado, adeeg, ama ganacsi lagu xusay daabacaaddaan ama lagu ogolaado gabagaba ahaan. Waxsoo saarkaan waxey kujirtaa bandhigga bulshada. Ogolaanshaha lagu soo saaraaya guud ahaan ama qeyb ka mid ah waa laogolaaday. Inkastoo ogolaansho dib loogu daabaco aan loo baahneyn, waxa lasoo qaadanaayo waa inuu ahaado: CADRE (2008). Tilaabooyinka Guul gaaridda: Xiriir lalayeesho Canugaada Dugsigiisa, , Eugene, Oregon, CADRE.

Direction Service
Somali